

# Ogeysiiska Ogolaanshaha Dadban ee Waalidiinta (Passive Consent\*)

## Qorshaha Degmada Iskuulka ee Ra'yi Aruurinta Ardayda

### Ra'yi Aruurinta Ardayda Minnesota ee 2022

Degmadeena iskuulku waxay waydiineysaa ardayda fasalada 5, 8, 9 iyo 11 inay ka qayb-qaataan Minnesota Student Survey (MSS) (Ra'yi Aruurinta Ardayda Minnesota ee 2022). Sharciga Federaalku wuxuu nooga baahan yahay in aanu waalidiinta ku wargelino howshan iskuulka lagu samaynayo. MSS waxaa lagu qabtaa dugsiyada ku yaalla gobolka oo dhan saddexdii sanoba mar.

Su'aalaha kujira ra'yi aruurintan (survey) waxay ku saabsan yihiin mawduucyo badan oo la xiriira nolosha dhalinyarada. Ra'yi aruurintan waxay wax ka waydiinaysaa sida iskuulku u socdo, qorshahooda mustaqbalka, waxqabadyada wakhtiga iskuulka ka baxsan, caafimaadka jirka iyo maskaxda, xiriirka, isticmaalka maandooriyaha iyo waxyaabo kale. Ardayda dugsiga sare waxaa la waydiinayaa wax ku saabsan hab-dhaqankooda la xiriira jinsiga. Macluumaadkan muhiimka ah ee ku saabsan fikirka iyo dabeecadaha wuxuu ka caawiyaa bulshada iyo iskuulada inay sameeyaan barnaamijyo wax ku ool ah oo ay bixiyaan adeegyo fiican.

Taariikhda (Taariikhaha) Minnesota Student Survey (MSS) la qaban doono waa: (date)

Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan Ra'yi aruurintan, fadlan la xiriir: (name, phone, email)

Waxaad xaq u leedahay inaad dib u eegto koobi/nuqul ah ra'yi aruurintan. Wixii faahfaahin ah ee ku saabsan sidii aad u samayn lahayd sidaas, fadlan la xiriir: (name, phone, email)

Ra'yi aruurintani waa qarsoodi. Si looga hortago in la garto shakhsiyaadka ama qoysaska, ardaydu ma sheegi doonaan magacyadooda, lambarka aqoonsiga ardayda ama macluumaad kale oo shakhsiyeed.

\*Ra'yi aruurintan waa ikhtiyaari. Waxaad dooran kartaa in ilmahaagu uusan ka qayb-qaadanin sarfeeyga adiga oo soo buuxinaya oo soo celinaya foomka hoose. Ardaydu waxay sidoo kale diidi karaan in ay qaataan qayb ka mid ah ra'yi aruurintan ama ra'yi aruurinta oo dhan. Shaqaalaha ayaa ogaysiin doona inay taas dooran karaan.

**Haddii aadan rabin in ilmahaagu qaato Minnesota Student Survey (Ra'yi Aruurinta Ardayda Minnesota), fadlan foomkan u soo celi: (name) ugu danbayn taariikhda ah: (date)**

Magaca ardayga: \_\_\_\_\_ Fasalka: \_\_\_\_\_

Iskuulka Ardayga: \_\_\_\_\_

Magaca Waalidka/Mas'uulka (Fadlan qor:) \_\_\_\_\_

Waxa aad u tahay ardayga: \_\_\_\_\_

Saxiixa Waalidka/Mas'uulka: \_\_\_\_\_ Taariikhda: \_\_\_\_\_